# Hannaan Doorasho oo Ku Habboon Maareynta Doorashooyinka Federaalka Soomaaliya

Faallo Kooban 48 | Luulyo 2026

**Soo koobid**

- Inkastoo afarta soo jeedin doorasho ay ku kala duwan yihiin qaab-dhismeedka hay'adeed, waxa ay dhamaan taageerayaan doorasho toos ah iyo joogteynta habka awood-qeybsiga beelaha ee 4.5, taasoo abuureysa aasaas adag oo xal lagu gaaro.
- Arrimaha ugu waaweyn ee uu khilaafka ka jiro ayaa ah nidaamka doorashada, deegaan-doorashada, guddiga maamulaya doorashada, diiwaangelinta codbixiyeyaasha, iyo habka loo dooranayo Aqalka Sare. Arrimaha muhiimka ah ee khuseeya hirgelinta doorashada – oo ay ku jiraan metelaadda haweenka, dowlad-goboleedka Waqooyi-bari, iyo aasaaska sharci ee doorashooyinka – ayaanan sidoo kale caddeyn.
- Faalladan Kooban waxa ay ku doodeysaa in kala duwanaanshahani aanu ahayn mid aan laga heshiin karin. Waxay soo jeedinaysaa qaab-dhismeed doorasho oo meel-dhexe ah oo isku geynaya arrimaha ugu muhiimsan ee afarta nooc doorasho, oo ay ku jiraan nidaamka doorasho ee Horreeyaa Guuleysta, deegaan-doorasho heer degmo ah, guddi maamul doorasho oo federaal ah oo madax-bannaan, musharrixiin xisbiyo ku tartama iyo kuwo madax-bannaan, codeynta iyo diiwaangelinta codbixiyaha oo isla maalin dhaca, soojeedin metelaadda Aqalka Sare, iyo halbeegyo lagu ilaalinayo metelaadda siyaasadeed ee haweenka.

**Ku saabsan Somali Public Agenda**

Somali Public Agenda (SPA) waa hay'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

**www.somalipublicagenda.org**

**© 2026 Somali Public Agenda**

## Hordhac

Doorashooyinka Soomaaliya ayaa mar kale laga wada-xaajoonayaa, iyadoo Dowladda Federaalka Soomaaliya ay sii waddo diyaargarowga doorashooyin toos ah oo ay ka qabato Galmudug iyo Hirshabeelle. Wadahadallada hadda socda ee u dhexeeya dowladda federaalka iyo saddex koox oo mucaarad ah – Golaha Mustaqbalka, Nabad & Nolol, iyo Golaha Midnimada– waxay si gaar ah diiradda u saarayaan doorashada Baarlamaanka Federaalka ee Soomaaliya, oo ka kooban Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare.

Faalladan Kooban waxay falanqeyneysaa afarta nooc doorasho oo ay soo bandhigeen dhinacyada wadaxaajoonaya, waxay gorfeyneysaa dhinacyada ay isaga midka yihiin iyo meelaha ay ku kala duwan yihiin, waxay iftiimineysaa arrimaha muhiimka ah ee aan weli la xallin, waxayna soo jeedinaysaa xal-dhexe oo suuragal ah oo taageeri kara heshiis doorasho in la gaaro.

## Afarta Nooc ee Doorasho

**Dowladda Federaalka ee Soomaaliya:** Nooca doorasho ee dowladda federaalka waxa uu ku saleysan yahay Cutubka Afaraad ee Dastuurka Federaalka ee wax-ka-beddelka lagu sameeyay, inkastoo wax-ka-beddelka dastuurka ay weli tahay arrin ay diiddan yihiin qaar ka mid ah jilayaasha siyaasadda. Waxa ay sidoo kale ku saleysan tahay saddex xeer doorasho: Xeerka Dhismaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka iyo Xuduudaha, Xeerka Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda, iyo Xeerka Doorashooyinka.

Astaamaha ugu muhiimsan nooca doorasho ee dowladda federaalka ee lagu dooranayo Baarlamaanka Federaalka waa:

- Metelaadda Isku-dheellitiran iyo Liiska Furan iyo dalka oo noqonaya hal deegaan-doorasho.
- Muwaadiniintu waxay u codeynayaan ururro siyaasadeed, ururradaas oo kuraasta u qoondeynaya musharrixiinta iyagoo ku saleynaya saamiga uu ururka ka helay codadka. Ururrada siyaasadeed ee boqolkiiba toban ama ka badan ka hela kuraasta baarlamaanka federaalka ayaa noqon doona xisbiyo siyaasadeed ee qaran.
- Doorashooyinka dhamaan saddexda heer ee dowladda waxaa maamulaya Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka iyo Xuduudaha.
- Nidaamka diiwaangelinta codbixiyeyaasha waa biometric.
- Hannaanka awood-qeybsiga beelaha ee 4.5 ayaa lagu saleynayaa xubnaha Baarlamaanka Federaalka.

Meelaha uu ku xooggan yahay nooca doorasho ee dowladda federaalka ayaa ah in hal deegaan-doorasho iyo metelaadda isku-dheelitiran ay xallin karaan doorashada kuraasta xildhibaannada Somaliland ee 57-da ah (46 Golaha Shacabka iyo 11 Aqalka Sare), iyo in la joogteynayo nidaamka awood-qeybsiga qabiilka ee 4.5.

**Golaha Mustaqbalka Soomaaliyeed:** Golaha Mustaqbalka Soomaaliyeed waxaa ku midoobay Madasha Samatabixinta iyo dowlad-goboleedyada Puntland iyo Jubaland. Waxaa ku jira dhowr hoggaamiyeyaal mucaarad oo caan ah, oo ay ku jiraan Madaxweyne hore iyo saddex Raysal Wasaareyaal hore, taasoo ka dhigaysa mid ka mid ah kooxaha ugu waaweyn ee mucaaradka ee qeybta ka ah wadahadallada. Kahor inta uusan dhammaan muddo-xileedka afarta sano ah ee Dowladda Federaalka (kaasoo Dastuurka wax laga beddelay uu ka dhigay shan sano) 15-kii Maarso 2026, dowladda federaalka waxay wadahadallo la yeelatay Golaha Mustaqbalka.

Nooca doorasho ee Golaha Mustaqbalka Soomaaliyeed waxaa uu leeyahay tilmaamahaan:

- Nidaam doorasho ku saleysan Horreeyaa Guuleysta, kaasoo ay muwaadiniintu si toos ah ugu codeynayaan shaqsiyaadka musharraxiinta ah halkii ay u codeyn lahaayeen ururro siyaasadeed.
- Sii joogteynta isticmaalka hannaanka awood-qeybsiga qabiilka ee 4.5.

- Diiwaangelin codbixiyeyaal oo ku salaysan warqado, iyo in doorashada iyo diiwaangelintu dhacaan isla hal maalin.
- Qaab-dhismeed maamul doorasho oo labo heer ah oo ka kooban Guddiga Hirgelinta Doorashooyinka Federaalka iyo Guddiyada Hirgelinta Doorashooyinka ee heer dowlad-goboleed.
- In dowlad-goboleed kasta uu yeesho afar degmo doorasho oo lagu qabto doorashooyinka Golaha Shacabka.

Meelaha uu ku xoogan yahay nooca doorasho ee Golaha Mustaqbalka waa inuu joogteynayo metelaadda kuraasta baarlamaanka ee ku salaysan qabiilka iyo in uu u oggolaanayo muwaadiniinta ay si toos ah u doortaan shaqsiyaadka musharraxiinta ah. Waxay sidoo kale habka diiwaangelinta yareyneysaa kharashaadka, gaabin karta muddada diyaargarowga, sidoo kalena fududeyn kartaa maamulka doorashada.

**Nabad & Nolol:** Nabad & Nolol, oo uu hoggaaminayo Madaxweynihii hore Maxamed Cabdullaahi Farmaajo, ayaa soo jeediyay nooc doorasho ku salaysan Metelaadda Isku-dheellitiran iyo Liiska Xiran. Soo jeedintu waxay si guud ugu egtahay heshiiskii doorashada oo ay Golaha Amniga Qaranka Baydhabo ku gaareen bishii Juun 2018, xilligii madaxweyne Farmaajo.

Tilmaamaha ugu muhiimsan ee uu leeyahay waxaa ka mid ah:

- Metelaadda Isku-dheellitiran iyo Liiska Xiran.
- Muwaadiniintu waxay u codeeynayaan xisbiyada siyaasadda halkii ay u codeyn lahaayeen musharraxiin.
- U furan hal deegaan-doorasho iyo degaan-doorashooyin heer dowlad-goboleed ama degmo ah.
- Hal guddi maamul doorasho oo federaal ah in uu maamulo doorashooyinka baarlamaanka.
- Joogteynta hannaanka awood-qeybsiga qabiilka ee 4.5.
- Doorasho toos ah oo Aqalka Sare ah.
- Diiwaangelin codbixiye oo ku salaysan warqad.

Meelaha uu ku xoogan yahay nooca doorasho ee Nabad & Nolol ayaa ah inay joogteynayaan qaab-dhismeedka awood-qeybsiga beelaha ee 4.5. U dabacsanaanta deegaan-doorashada ayaa sidoo kale noqon karta mid abuuri karta xal meel dhexaad ah.

**Golaha Midnimada Soomaaliyeed:** Golaha Midnimada Soomaaliyeed waa isbahaysi siyaasadeed oo dhawaan la aasaasay oo uu hoggaamino Raysal Wasaare hore Cumar Cabdirashiid. In badan oo kamid ah xubnaha golahan waxay horey ugu jireen Madasha Samatabixinta Soomaaliyeed balse markii dambe waxay sameeysteen madal ka duwan ka dib markii ay heshiis kala gaareen dowladda federaalka bishii Agoosto 2025-kii arrimo dastuuri ah oo dhowr ah oo markii dambe kasoo muuqday wax-ka-beddelka dastuurka oo la ansixiyay Maarso 2026.

Nooca doorasho ee Golaha Midnimada Soomaaliyeed waxa uu leeyahay astaamaha soo socda:

- Nidaam doorasho oo ah Horreeyaa Guuleysta.
- Deegaan doorashooyin ku salaysan lix degmo ama ka badan ee dowlad-goboleed kasta.
- Diiwaangelin codbixiye oo maamulkiisu heer qaran yahay.
- Musharraxiin Baarlamaan oo ay soo magacaabayaan xisbiyada siyaasadda.
- Guddi doorasho federaal oo madax-bannaan in uu maamulo doorashooyinka baarlamaanka.
- In xubnaha Aqalka Sare lagu doorto nidaam codbixin oo heer dowlad-goboleed ah.
- Dhismaha Guddiga Xallinta Khilaafaadka Doorashada, iyadoo Maxkamadda Sare ay noqoneyso maxkamadda racfaanka iyo sidoo kalena kormeereyso khilaafaadka doorashada.
- Ilaalinta qoondada 30 boqolkiiba ee haweenka ee labada aqal ee Baarlamaanka.

Soo jeedinta Golaha Midnimada Soomaaliyeed waxay maamulka doorashada ku xoojineysaa hab madax-bannaan oo lagu xallinayo khilaafaadka doorashada iyagoo sidoo kale soo jeediyay in la ilaaliyo ballanqaadka dastuuriga ee metelaadda siyaasadeed ee haweenka. Inkastoo ay shardi ka dhigayaan in musharixiinta baarlamaanka ay ka yimaadaan xisbiyada siyaasadda, waxay sidoo kale taageerayaan in si tartiib tartiib ah loo hirgeliyo nidaamka xisbiyada siyaasadda ee Soomaaliya iyadoo la joogteynayo asteynta kuraasta baarlamaanka ee qabiilka ku saleysan.

## Isku Ekaanshaha, Kala Duwanaanshaha, iyo Arrimaha Aan Weli La Caddeyn

Afarta nooc doorasho waxay wadaagaan dhowr arrimood oo muhiim ah. Dhinacyada ay ka mideysan yihiin ayaa abuuraya aasaas lagu gaari karo xal siyaasadeed waxayna muujineysaa in wadahadalada aanan diiradda lagu saareynin in la qabto doorasho toos ah iyo in kale ee diiradda lagu saarayo sida loo qaban lahaa.

Labada meelood ee ugu muhiimsan ee ay ka mideysan yihiin ayaa ah, in dhammaan afarta nooc doorasho ay taageerayaan doorashooyin toos ah oo lagusoo doorto Baarlamaanka Federaalka, midda labaadna waa in dhammaantood ay rabaan sii isticmaalka habka awood-qeybsiga qabiilka ee 4.5. Tani waxay muujineysaa faham siyaasadeed oo ballaaran oo ah in Soomaaliya ay u gudubto doorashooyin toos ah iyadoo kuraasta baarlamaanka ee wareegga doorasho ee xiga lagu saleynayo qoondeynta qabiilka ee kuraasta baarlamaanka ee horey u jirtay.

Waxaa sidoo kale jira waxyaabo muhiim ah oo ay ka siman yihiin soo jeedinno gaar ah:

- **Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Nabad & Nolol** waxay labadooduba doonayaan Metelaadda Isku-dheellitiran, taasoo muwaadiniintu ay u codeeynayaan xisbiyada siyaasadda halkii ay uga codeyn lahaayeen musharixiin shaqsi ah. Labaduba waxay sidoo kale ka mideysan yihiin sii isticmaalka habka awood-qeybsiga qabiilka ee 4.5 waxayna taageeraan hal deegaan doorasho, inkastoo Nabad & Nolol ay muujiyeen dabacsanaan ku saabsan deegaan-doorashada.
- **Golaha Mustaqbalka Soomaaliya iyo Golaha Midnimada Soomaaliya** labaduba waxay taageersan yihiin nidaamka doorasho ee Horreeyaa Guuleysta iyagoo ilaalinaya habka awood-qeybsiga qabiilka ee 4.5. Labada soo jeedinba waxay sidoo kale taageersan yihiin diiwaangelinta codbixiyeyaasha oo ku salaysan warqadaha.

Waxaa sidoo kale jira kala duwanaansho dhowr ah muhiim ah.

- **Tan koowaad waxay khuseysaa nidaamka doorashada laftiisa** – Metelaadda Isku-dheellitiran mise Horreeyaa Guuleysta. Kala duwanaanshahani wuxuu saameyn ballaaran ku leeyahay deegaan doorashada, haddii muwaadiniintu u codeeynayaan xisbiyada siyaasadda ama shaqsiyaadka musharraxiinta ah, iyo sida xubnaha baarlamaanka ku metelaya Somaliland loo waafajin karo qaab-dhismeedka doorashada.
- **Tan labaad waxay khuseysaa maamulka doorashada.** Afarta nooc doorasho waxay soo bandhigayaan saddex hab maamul oo kala duwan. Marka la eego dowladda federaalka, sida ku xusan Xeerka Dhismaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka iyo Xuduudaha, masuuliyadda maamulka doorashooyinka dhamaan heerarka kala duwan ee dowladda waxaa iska leh Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka iyo Xuduudaha. Nabad & Nolol iyo Golaha Midnimada Soomaaliyeed waxay soo jeediyeen hal guddi doorasho oo heer federaal ah oo madax-bannaan in uu maamulo doorashooyinka baarlamaanka federaalka. Taas bedelkeeda, Golaha Mustaqbalka Soomaaliya wuxuu soo jeediyay hab-maamul baahsan oo ka kooban hal guddi doorasho oo heer federaal ah iyo guddiyo doorasho oo heer dowlad-goboleed ah oo laga dhiso dowlad-goboleed kasta.

- **Farqiga saddexaad wuxuu la xiriiraa diiwaangelinta codbixiyeyaasha.** Dowladda federaalka waxay rabtaa diiwaangelin codbixiyeyaasha oo biometric ah, halka saddexda soo jeedin ee kale ay taageersan yihiin diiwaangelinta ku saleysan warqado, iyagoo ku doodaya inay ku habboon tahay marka la qiimeeyo waqtiga iyo dhaqaalaha xaddidan ee la heli karo doorashooyinka kahor.

Inkastoo kala duwanaanshahani ay muhiim yihiin, haddana ma aha kuwo aan laga gudbi karin. Arrimaha la wadaago ee doorashooyin toos ah iyo sii isticmaalka adeegsiga habka awood-qeybsiga qabiilka ee 4.5 ayaa abuuraya saldhig xal-dhexe lagu gaari karo.

**Unaddressed Issues**

| | FGS<br>FEDERAL GOVERNMENT | Nabad & Nolol<br>OPPOSITION BLOC | Somali Unity Council<br>OPPOSITION COALITION | Somali Future Council<br>OPPOSITION ALLIANCE |
|---|---|---|---|---|
| PARTIALLY ADDRESSED<br>**Women's 30% quota**<br>POLITICAL | Explicitly reaffirmed — both chambers | — | Explicitly protected — both chambers | — |
| PARTIALLY ADDRESSED<br>**Election of the Upper House**<br>POLITICAL | — | Direct election | State-level voting processes | — |
| SINGLE PROPOSER<br>**Electoral dispute resolution**<br>POLITICAL | — | — | Dispute Resolution Commission; Supreme Court on appeal | — |
| NOT YET ADDRESSED<br>**Northeastern State seat allocation**<br>POLITICAL | — | — | — | — |

Intaa waxaa dheer, inkastoo afarta nooc doorasho ay ka hadlayaan dhinacyo badan oo geeddi-socodka doorashada, haddana dhowr arrimood oo muhiim ah ayaan weli la caddeyn. Kuma filna oo kaliya in xal laga gaaro nooca doorasha; dhinacyada gorgortanku waxay sidoo kale u baahnaan doonaan inay caddeeyaan dhowr arrimood oo kale.

- **Arrin oo muhiim ah ayaa ah metelaadda siyaasadeed ee haweenka.** Inkastoo sharciga doorashada ee dowladda federaalka iyo soo jeedinta Golaha Midnimada Soomaaliyeed ay si cad u xaqiijinayaan qoondada 30 boqolkiiba ee haweenka ee labada aqal ee Baarlamaanka, soo jeedinaha kale ayaa faahfaahin xaddidan ka bixiyay sida loo hirgelin doono qoondada haweenka. Maadaama nidaamyada doorasho ee kala duwan ay leeyihiin saameynno kala duwan oo metelaadda haweenka ah, heshiis kasta waa inuu si cad u qeexaa sida loo ilaalin doono qoondada.
- **Arrinta labaad oo aan la caddeyn ayaa khuseysa doorashada Aqalka Sare**. Inkastoo dhowr soo jeedin ay ku baaqayaan doorashooyin toos ah, haddana midna si buuxda uma sharraxayo sida 54-ta xubnood ee Aqalka Sare loogu dooran doono qaab-dhismeed doorasho oo federaal ah oo ku salaysan qabiil. Maadaama Aqalka Sare uu yahay aqal metelaya dowlad-goboleedyada, sida xubnihiisa loosoo dooranayo ayaa u baahan caddayn dheeraad ah.
- **Arrinta saddexaad waxay khuseysaa Dowlad-goboleedka Waqooyi-bari.** Dhismaha dowlad-goboleedka cusub wuxuu saameyn ku leeyahay deegaan-doorashada iyo qoondeynta kuraasta ee Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare labadaba. Afarta soo jeedin midkoodna kama hadlin sida kuraasta baarlamaanka loogu qoondeyn doono dowlad-goboleedka Waqooyi-bari.

**Differences**

| | FGS<br>FEDERAL GOVERNMENT | Nabad & Nolol<br>OPPOSITION BLOC | Somali Unity Council<br>OPPOSITION COALITION | Somali Future Council<br>OPPOSITION ALLIANCE |
|---|---|---|---|---|
| PR VS FPTP<br>**Electoral system**<br>POLITICAL | Open-List PR (OLPR) | Closed-List PR (CLPR) | First-Past-the-Post | First-Past-the-Post |
| MIXED POSITIONS<br>**Constituency design**<br>POLITICAL | Single National Constituency | Flexible — national or state-level | Six or more districts per state | Four districts per state |
| THREE DISTINCT APPROACHES<br>**Election management body**<br>POLITICAL | NIEBC administers all levels (centralised) | Single independent federal commission | Independent federal commission | Two-tier — federal (FEIC) + state committees (SEICs) |
| BIOMETRIC VS PAPER-BASED<br>**Voter registration**<br>TECHNICAL | Biometric (unique biometric ID) | Paper-based | Paper-based (nationally coordinated) | Paper-based, same-day |
| PARTY VS INDIVIDUAL CANDIDATES<br>**Role of political parties**<br>POLITICAL | Vote for political associations | Vote for political parties | Candidates nominated by parties | Parties do not participate — individuals only |

## Qaab-dhismeed Doorasho oo Xal-dhexe ah

Inkastoo weli afarta nooc doorasho ay kala duwanaansho ka jiraan, haddana waxay muujinayaan meelo muhiim ah oo ay iska waafaqsan yihiin. Halkii laga qaadan lahaa hal soo jeedin, dhinacyada wadaxaajoodka ku jira waxay sameyn karaan nooc xal dhexe ah oo ka kooban qodobada ugu xoogan ee soo jeedin kasta. Xal dhexe waxaa lagu gaari karaa iyadoo arrimo kala duwan oo muhiim ah laga soo qaadanaayo soo jeedimaha.

**1. Nidaamka Doorashada:** Maadaama dhammaan dhinacyada ay isku raacsan yihiin doorasho toos ah, habka awood-qeybsiga qabiilka ee 4.5-na uu yahay midka la doorbidayo, waxaan soo jeedinaynaa in la qaato nooca Horreeyaa Guuleysta. Nidaamkani waa mid aad ugu fudud asteynta kuraasta baarlamaanka ee beelaha, maadaama uusan u baahneyn in isbeddel lagu sameeyo qeybinta kuraasta ee hadda jirta ee Golaha Shacabka.

Taas caksigeeda, inkastoo ay suuragal tahay in la ilaaliyo qoondada kuraasta ee ku salaysan qabiilka iyadoo la raacayo nidaamka metelaadda isku-dheellitiran (gaar ahaan haddii habka awood-qaybsiga qabiilka ee 4.5 la ilaalinayo heerka sare, sida in 61 xildhibaan ee Hawiye, Daarood, iyo Digil & Mirifle midkiiba, iyo in 31 Xildhibaan ee kooxaha .5), ku dhaqanka metelaadda isku-dheellitiran ee heerka 275-ka kursi waxay noqoneysaa mid aad u adag. Adkaanshaha noocaas ah wuxuu yareyn karaa hufnaanta iyo kalsoonida dadweynaha ee natiijada doorashada waxa uuna xoojin karaa in hoggaamiyeyaasha xisbiyada ay go'aamiyaan musharraxiinta ku guuleysta kuraasta baarlamaanka ee loo qoondeeyay qabiil kasta. Inkastoo metelaadda isku-dheellitiran ay noqon karto mid ku habboon marka uu biseyl gaaro nidaamka xisbiyada siyaasadeed ee Soomaaliya, nooca Horreeyaa Guuleysta ayaa ah nooca ugu macquulsan ee doorashooyinka wakhtiga dhaw.

**2. Deegaan-doorashada:** Kursi qabiil kasta ayaa loo baahan doonaa in goob deegaan-doorasho u ah loo cayimmo. Arrintan ayaa noqon karta geedi-socod adag oo caqabad badan, in la fududeeyo ayaa aad muhiim u ah. Marka hore, waa in guddiga maamulka doorashada uu aqoonsadaa degmooyinka ka horreeyay 1991 ee buuxiya shuruudaha amni ee lagu heshiiyo, iyo sidoo kale goobaha codbixinta ee suuragalka ah ee laga sameyn karo. Marka labaad, kursi kasta oo qabiil waa in loo asteeyaa mid ka mid ah degmooyinkan iyadoo lagu saleynayo wadahadal ay yeelanayaan dowlad-goboleedyada, odayaasha, xisbiyada siyaasadda, iyo musharraxiinta madaxa-bannaan. Codbixiyayaasha degmo kasta ayaa markaas awoodi doona inay doortaan kuraasta qabiilka ee loo qoondeeyay deegaannadooda.

Geedi-socodkaan wuxuu u baahnaan doonaa in uu tixgeliyo asteynta kuraasta ee Muqdisho, taas oo (marka laga reebo kuraasta beelaha Banaadiriga) aan metelaad toos ah ku lahayn Golaha Shacabka. Boqolleey go'an oo kuraasta hadda loo qoondeeyay dowlad-goboleedyada ayaa loo wareejin karaa degmooyinka ku yaalla caasimadda si wax looga qabto isku-dheelitir la'aantan.

Hal caqabad oo uu yeelanaayo nidaamka Horreeyaa Guleysta ayaa ah kuraasta baarlamaanka ee Somaliland. Labo ikhtiyaar oo suuragal ah ayaa la tixgelin karaa. Tan koowaad ayaa ah in Muqdisho laga dhigo goobta codbixinta kuraastan, taasoo u oggolaanaysa xubnaha beelaha kasoo jeeda Somaliland ee ku nool Muqdisho inay isdiiwaangeliyaan oo ay codeeyaan. Haddii kale, kuraastan waxaa lagu dooran karaa iyadoo loo marayo geeddi-socod doorasho dadban oo loogu talagalay marxaladdan doorasho oo keliya.

**3. Maamulka Doorashada:** Maamulka doorashada ayaa la dhihi karaa waa arrinta ugu adag, maadaama ay u badan tahay inay tahay midka ugu muhiimsan ee go'aamiya cidda saameynta ku yeelanaysa hannaanka doorashada. Hababka maamulka doorashada ee ay soo jeediyeen Nabad & Nolol iyo Golaha Midnimada ayaa saldhig u ah xal-dhexe, taasoo ah in doorashada federaalku ay maamulaan hay'ad maareyn doorasho oo shaqada kaliya ee loo igmaday ay tahay maamulidda doorashada baarlamaanka federaalka. Si looga fogaado qaab-dhismeedkii maamul ee 2021-22, guddiga doorashada federaalka waxaa la siin karaa awood ay ku dhistaan guddiyo fulineed oo heer dowlad-goboleed ah oo masuul ka

ah maamulidda doorashooyinka guud ahaan deegaannada kala duwan ee doorashada.

Tan ugu muhiimsan, waa in guddiga doorashada uu helo kalsoonida dhammaan daneeyayaasha siyaasadda. Si taas loo gaaro, waa magacaabisya xubnaha guddiga ay ka wada xaajoodaan dowladda federaalka, dowlad-goboleeyada, Golaha Mustaqbalka, Golaha Midnimada, iyo Nabad & Nolol si wadar-oggol loogu go'aamiyo arrimaha fulinta.

**4. Xisbiyada Siyaasadeed:** Xal dhexe waxa uu noqon karaa in dhammaan musharraxiinta baarlamaanka ay ku tartamaan doorashada iyagoo hoos tagaya xisbi siyaasadeed ama urur siyaasadeed oo diiwaangashan. Waxaa ka mid noqon kara xisbiyada uu diiwaangeliyay Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka iyo Xuduudada, iyo sidoo kale kuwii uu sida kumeelgaarka ah u diiwaangeliyay Guddigii hore ee Madaxbanaanaa ee Doorashooyinka Qaranka.

Islamarkaana, waa in musharixiinta madaxa-bannaan ee aan xubin ka ahayn xisbi siyaasadeed loo oggolaadaa inay u tartamaan kuraasta baarlamaanka. Dowladda xigta ayaa qaabeyn karta hawsha is-waafajinta qaab-dhismeedka sharci ee lagu maamulayo xisbiyada siyaasadda.

**5. Diiwaangelinta Cod-bixiyeyaasha:** Iyadoo la tixgelinayo waqtiga xaddidan ee ka harsan doorashooyinka, oo ay weheliso caqabadaha hirgelin iyo dhaqaale, diiwaangelin cod-bixiyeyaasha oo ku saleysan warqad, oo dhacdana maalinta codeynta ayaa ah ikhtiyaarka ugu macquulsan ee wareegga doorasho ee soo socda.

Inkastoo diiwaangelinta biometric-ga ah ay xaaladaha qaar keeni karto ilaalin xooggan oo ka dhan ah ku shubashada codadka doorashada, waxtarkeedu wuxuu ku xiran yahay ilo dhaqaale oo ku filan, awood farsamo, kalsoonida daneeyayaasha, iyo waqti diyaargarow oo ku filan. Shuruudahan la'aantood, nidaamka biometric-ga wuxuu sida nooca ku salaysan warqadda oo kale ugu nugul yahay wax is-daba-marin.

**6. Doorashada Aqalka Sare:** Doorashada Aqalka Sare waxay u baahan tahay hab gaar ah oo ka tarjumaya doorka dastuuriga ah ee golahan metelaya dowlad-goboleedyada. Sikastaba ha ahaatee, ka hor inta aan la go'aamin geedi-socodka doorashada, waa in dib loo eegaa asteynta kuraasta Aqalka Sare iyadoo la tixgelinayo aasaaska dowlad-goboleedka Waqooyi-bari ee Soomaaliya sanadka 2025. Mid ka mid ah xulashooyinka suuragalka ah ayaa ah in Somaliland iyo Puntland uu mid walba labo kursi u wareejiyo dowlad-goboleedka Waqooyi-bari, taasoo ka dhigeysa Somaliland iyo Puntland midkiiba sagaal kursi iyo dowlad-goboleedka Waqooyi-bari oo yeelanaya afar kursi.

Marka la eego habka doorashada, senatarada waxaa sii dooran kara xildhibaannada dowlad-goboleedyada. Sikastaba ha ahaatee waa in dib loo eegaa habkii hore oo ay Madaxweynayaasha dowlad-goboleedyada musharraxiinta kursi kasta ku soo magacaabi jireen. Taas beddelkeeda, waa in dhammaan musharrixiinta u qalma – ha ahaadaan kuwo madax-bannaan ama kuwo katirsan xisbiyada siyaasadda – loo oggolaadaa inay si toos ah isaga diiwaangeliyaan guddiga maamulaya doorashada, halka sharci-dejiyeyaasha dowlad-goboleedyadu ay u codeynayaan.

**7. Metelaadda Siyaasadda ee Haweenka:** Ilaalinta qoondada 30 boqolkiiba ee metelaadda haweenka ayaa ah mid aad u adag marka loo eego nidaamka Horreeyaa Guuleysta, balse ma ahan mid aan suuragal ahayn. Hal ikhtiyaar oo wax-ku-ool ah ayaa ah in si aan kala sooc lahayn loogu asteeyo 30 boqolkiiba kuraasta loo qoondeeyay dowlad-goboleed kasta inay noqdaan kuraas haweenka u gaar ah. Marka kuraasta baarlamaanka loogu asteeyo dowlad-goboleedyada, haweenka oo keliya ayaa xaq u lahaanaya inay ku tartamaan kuraastan. Habkan aan kala sooca lahayn wuxuu ka caawinaa in laga fogaado habka inta badan la siyaasadeeyo ee metelaadda haweeenka iyo qoondeynta kuraasta ee geedi-socodyadii doorasho ee hore wuxuuna ka fogaan doonaa in kuraasta haweenka loo badiyo kooxaha siyaasad ama dhaqaale ahaa hooseeya.

Xulashooyinkan xalka dhexe ah waxay muujinaayaan in farqiga u dhexeeya afarta nooc doorasho aanu ahayn mid aan la iswaafajin karin. Iyadoo lagasoo qaadanayo qodobada ugu muhiimsan ee nooc doorasho kasta, xubnaha wadahadlaya waxa ay la imaan karaan qaab-dhismeed doorasho leh taageero siyaasadeed oo ballaaran oo ay hirgelintiisu maamul ahaan fududdahay tahay.

## Arrimo Kale oo ay Tahay in La Caddeeyo

Marka lagasoo tago isku-waafajinta noocyada doorasho, dhinacyada wadaxaajoodka ku jira waxay sidoo kale u baahan doonaan inay xalliyaan labo arrimood oo la xiriira sharciga iyo fulinta oo muhiim ah.

Midda koowaad, dhinacyadu waa inay caddeeyaan in doorashooyinka soo socda sal looga dhigi doono Dastuurka Federaalka ee Kumeelgaarka ah ee 2012 mise Dastuurka wax laga beddelay ee la ansixiyay 2026. Maadaama wax-ka-beddelka dastuurka ay weli ku muransan yihiin dhinacyada wadaxaajoodka ku jira, heshiisku waa inuu sidoo kale qeexaa sida qodobbada dastuuriga ah ee la xiriira doorashooyinka loo fasiran doono loona dabaqi doono inta lagu jiro kala-guurka.

Midda labaad, waa in dhinacyadu ay caddeeyaan habka ansixinta heshiiska doorasho. Heshiiska ma waxaa ansixinaaya Baarlamaanka Federaalka ee hadda jira – si la mid ah habkii ansixin ee heshiiskii doorashada ee Sebtembar 2020 ee lagu gaaray Muqdisho – kaasoo muddadiisa ay weli ku muransan yihiin dhinacyada siyaasadda, mise saxiixa madaxda wadaxaajoodka ku jira ayaa ku filan? Caddeynta su'aashan waxay xoojin doontaa awoodda sharci iyo sharci ahaanshaha siyaasadeed ee heshiiska.

## Gunaanad

Inkastoo afarta nooc doorasho ay ku kala duwan yihiin qaab-dhismeedkooda hay'adeed, dhammaantood waxay taageerayaan doorashooyin toos ah iyo sii joogteynta habka awood-qeybsiga qabiilka ee 4.5, taasoo sal adag siinaysa xal-dhexe oo siyaasadeed. Kala duwanaanshaha ugu muhiimsan wuxuu ka jiraa nidaamka doorashada, deegaan-doorashada, maareynta doorashooyinka, diiwaangelinta codbixiyayaasha, iyo doorashada Aqalka Sare. Faalladan Kooban waxay ku doodaysaa in kala duwanaanshahani aanu ahayn mid aan la is-waafajin karin waxayna soo jeedinaysaa qaab-dhismeed wax-ku-ool ah oo xal dhexe lagu gaaro oo isku geynaya qeybaha ugu xooggan ee afarta nooc doorasho, oo ay ku jiraan nidaamka doorasho ee Horreeyaa Guuleysta, deegaan-doorashooyin juqraafi ahaan loo qoondeeyay, guddi madax-bannaan oo maamula doorashada federaalka, musharrixiin katirsan xisbiyo iyo kuwa madax-bannaan, diiwaangelin codbixiyeyaal la sameeyo islamaalinta doorashada, hab dib loo eegay oo lagu dooranayo Aqalka Sare, iyo hal-beegyo lagu ilaalinayo metelaadda siyaasadeed ee haweenka.

SOMALI PUBLIC AGENDA

**Somali Public Agenda**

Mogadishu Somalia

+252(0)85 8358

info@somalipublicagenda.org

<https://www.somalipublicagenda.org>

@somalipubagenda